

Bilowga Tabaabushada

Hagahan kala soco si aad uga faa'iidayatid isticmaalkaaga Go-To Card, Metropass ama Go-To College .



KAARKAAGA DIWAANGASHO

Kaarkaaga ka diwaangasho metrotransit.org/register. Waa LACAGLA'AAN. Qiimaha uu kaarkaaga leeyahay waxa aad badbaadin doontaa marka uu lumo amaa la xado. Waxaa kale oo talo fiican ah in kaarkaaga lambarkiisa taxanaha ah aad diwaangaliso iyo meel xafidan dhigato.

Xusuuso: Kaarka Go-To Card ee aan la diwaangalin mid kale laguma baddali karo.

ISKA BIXI LACAGTA TIGIDHKA

Marka baska aad raacayso

Si aad u baxsato lacagta tigidhkaaga marka aad baska raacayso, kaarkaaga Go-To goobadiisa inta taabato ku aaddi mashiinka tigidhaha aqriya.



Halkaan ka bixi lacagta tigidhkaaga baska aad ku raacayso



MARKA QIIMAHA LAGU KORDHINAYO AMA DHAAFIYAHA 31GA-CISHO

Waa in **INTERNETKA** laga galo metrotransit.org ama kaarka lacagta la xoqo*

Waa in la waco **TELEFOONKA** 612-373-3333, uu la socdo kaarka lacagta la xoqo*

Waa in **WARQAD LOO DIRO** lana soo raaciyo kaarka lacagta la xoqo. Wac 612-373-3333 ama warqad lagu codsado ama internetka laga galayo metrotransit.org.*

In ka kaban 40 **GOOBO TAFARIIQ** ay ka mid yihiin xaruumaha Metro Transit ee ku yaalla magaalada hoose ee Minneapolis iyo St. Paul lacag caddaan ah, jeegga ama kaarka la xoqo lagu iibsano. Booqo metrotransit.org ama meelo kale wac 612-373-3333.

Lacag caddaan ah ama kaarka la xoqo lagaga iibsano **MASHIINKA TIGIDHADA TAREENKA (RAIL TICKET MACHINE)**

* Waxaa dhici karta in ay saddex cisho ee maalmaha shaqada kugu qaadato si qiimaaha kaarka ku filan lagu helo.

Marka tareenka aad raacayso

Kahor intaa aadan tareenka raacin, kaarkaaga GO-To goobadiisa in taabato ku aaddi mashinka wax aqriya ee rug walba ee tareenka Northstar. Kan tigidhkaaga ayuu ansaxinyaa.



Halkaan ka bixi lacagta tigidhkaaga ama ka ansaxi dhaafiyahaaga tareenka aad ku raacayso.



Mashiinka Tigidhaha ee Kaarkaaga aad halkaan qiimaha ku siyaadsanayso.

TIGIDHKAAGA ANSAXI

Kaddib marka aad kaarkaaga Go-To aad goobaabada ku taabato, aqriyaha ayaa dhawaaqaya (biip), shaashadda waxa ay ku oranaysaa "GO" ama "Transfer" kaddibna nalka ayaa cagaar isu baddalaya.

Waxaa muhiim ah in aad kaargaaga ansaxiso: Haddii aad ansixin waydo waxaa lagu goynayaa tigidh ganaax ee \$180 ama kaarkaaga isticmaalkiisa la xayirayaa.




ISKA HUBSO QIIMAHA BAAQIQA EE KAARKAAGA KU JIRA

Waa in internetka laga galo metrotransit.org (halkaan ayaa xitaa ka daawa kartaa safarradii hore)

Telefoonka lagu waco 612-373-3333



Tareenka gudahiisa: Riix Furaha B (Press Key B) ee aqriyaha kaarka kahor inta aadan riixin goobada kaarkaaga ee goobada Go-To.



Baska gudahiisa: Dareewalka u sheeg in aad rabto baaqiqa ku haray kaarkaaga kahor intaadan riixin goobada kaarkaaga Go-To



MARKA QIIMAHA KOOX AHAAN LAGU BIXINAYO

Waxa aad awoodda in aad qiimaha kaarkaaga ku jira aad ku iibsato ilaa sideed tigidh mar kaliya.



Tareenka gudihiisa: Tilmaanbixiyeyaasha aqriyaha kaarka raac. Si aad hawsha u dedejiso, iskuday in aad macaamil waliba Go-To Card.



Baska gudihiisa: Dareewalka u sheeg inta tigidh ee aad iibsan doonto KAHOR inta aadan riixin goobada kaarka Go-To.

Marka aad iibsato Go-To Card, Metropass ama Go-To College Pass, waxaad ballaanqaadaysaa in aad dhawrayso xeerarka iyo sharuudaha ay dajiyeen Metropolitan Council. Waxa aad xeerarka iyo sharuudaha ka eegtaa metrotransit.org ama adiga oo ka codsada nuqul Xariirka Macaamilka ee laga helo 612-373-3333.

Hagaha Isticmaalayaasha



Safar wanaagsan.
Kayd fudud.

WAXTARKA QIIMAHA KU KAYDSAN IYO 31-DAY PASSES (DHAAFIYAHAAGA 31GA CISHO)

Qiimaha kaydsan waxa ay la midtahay ayadoo lacag caddaan ah la haysto ama waxa aad kaarkaaga ku kaydsan kartaa qiimo dhan ilaa \$400. Markasta ee aad raacdid, qiimaha tigidhka si toosa ayaay looga jaraaya. Qiimaha kaydsan waa fursad weyn haddii aad ay jirto in aad gaadiidka raacdo wax ka yar shan cisho toddobaadkiiba ama aad tahay qof tareenka raacaya si u xafud u tago. Qiimaha kaydsan waa wax kugu waajiba marka aad Northstar raacaysid.

31-Day Pass (Dhaafiyaha 31ga Cisho) waxaa dadka raaca uu u soo bandhigayaa in muddo 31 cisho gudaheeda ay baska iyo tareenka ku raacaan si aan xad lahayn marka ugu horraysa ee la isticmaalayo. Waxaa si weyn uga faa'iidaysan kara dadka isticmaala shan cisho ama ka badan toddobaadkiiba. Waxa aad goosan kartaa ilaa laba kaarkaaga ee 31ga Cisho marka aad doonto kuwaaso noqda mid aad hadda isticmaashid iyo mid aad maustaqbal dambe isticmaali doontid.

Booqo metrotransit.org si aad ku barato fursadahaaga kale ee jira.

WAXQABAD FUDUD

Haddii kaarkaaga uu lumo ama la xado

Haddii uu kaarkaga uu shaqayn waayo

Si aad u baddalato macluumaadka gaarka ku ah

Go-To Card



Wac 612-373-3333 si aad kaarkaaga isticmaalkiisa u joojiisid iyo aad mi kale ku codsato.

Xusuuso: Haddii kaarkaaga uu ku siiyay loo shaqeeye ama urur, maamulaha barnaamijka ururkaaga la socodsii.

Tigidhkaaga lacag caddan ah ku iibso waxaana wacdaa Xirirka Macaamilka ee laga helo 612-373-3333 ama waxa aad aaddaa xarunta Metro Transit si aad baddalato.

Booqo metrotransit.org/register waxaana loo baahaynahay jawaabta su'aashaada sirta si baddallada lagu sameeyo.

Metropass iyo Go-To College Pass



La soo xariir maamulaha barnaamijka ururkaaga.

Tigidhkaaga lacag caddan ah ku iibso iyo la soo xariir maamulaha barnaamijka ururkaaga.

La soo xariir maamulaha barnaamijka ururkaaga.

Hagaha Isticmaalayaasha



Ma waxaa weli layga rabaa in aan baddalasho weydiistoo?

Maya. Haddii aad tahay qof baska ama tareenka raacaya, baddalaadda waxa si toosa uu qayb ka yahay kaarkaaga. Haddii tigidh loogu baddasho waddo kale qiima ka sarreya uu ku baxayo (tusaale, Northstar), kaarkaaga ayaa kabaya faraqa u dhaxeeya qiimaha tigidhka waa haddii uu kaarkaaga ku jiro qiimo kayd ah.

Haddii ay dhacdo in aanan kaarka isticmaalin in muddo ah, ma laga yaabaa in uu weli shaqayn doono?

Isticmaalka kaarka waxaa lagu joojinayaa haddii aan muddo laba sano aan la isticmaalin. Si aad kaarkaaga dib loogu isticmaalo, u soo qaado xarun Metro Transit ama Xiriirka Macaamilka.

Kaarkayga ma leeyahay taariiq uu dhacayoo?

Kaarkaga waxaa si toosa uu u dhacaya 10 sano marka laga soo wareego tariiqdii la bixiyay. Go-To College Passes waxa ay dhacayaan dhammadka lixbiloodlaha. Metropasses waxa ay dhacayaan marka ururka laga baxo.

Sideen kaarkayga u xafidiyaa?

Kaararku waxa ay ka samaysanyihiin sanco adag, haddana waa nugulyahay. Kaarkaaga ku xafido boorsada yar ama jeeb balastiko ka samayan oo ay ku qorantahay HA XOQIN, ha laablaabin ama ha duleelin.

Metro Transit

560 Sixth Avenue North
Minneapolis, MN
55411-4398

Macluumaadka waddooyinka la qaadanaayo iyo jadwalka & Xiriirka Macaamilka:
612-373-3333
metrotransit.org

